



Shaashada Cusub ee PPS.net ee Ururinta Xogta Xanuunka COVID-19

Sebtember 14, 2021

Qoysaska iyo Ardayda Qaaliga ah,

Iyada oo ay naga go'an tahay sidii aad ula socon lahaydeen wixii xog ah, waxaan dhisnay Shaashad aad loo hormariyey oo macluumaad fara badan ku jiraan sidii aad u ogaan lahaydeen xaalada cudurka COVID-19.

[PPS.net/COVID19Dashboard](https://pps.net/COVID19Dashboard)

Shaashada COVID-19 waxa ay siineysaa bulshadeena tirada warbixinaha ardayda ama shaqaalaha la weydiistay inay iskaliyeeyaan ama ay iskaarntimeeyaan todobadii maalmood ee ugu dambeeyey. Fadlan waxaad ogaataan inay hay'adaha kale sida Hay'ada Caafimaadka Oregon Iyana ay tiriyaan xogta ku saabsan kiisaska COVID-19 bulshadeena; shaashad kastaa waxaa la cusbooneysiyaan xogta ay xambaarsan tahay waqtiyo kala gedisan sidaas awgeed waxaa dhici karta inay jiri karto kala duwanaansho dhinaca tirooyinka shaashadaha.

Waa kuwani wax aad ku arki doonto shaashada :

- **Tirada Iskaliyeysay:** Dadka markii la baaray la ogaaday inay qabaan xanuunka COVID-19 ama kuwa loo malaynayo inay qabaan COVID-19. Dadkani waxaa loo sheegay inayna aanay u tagin dadka caafimaadka qaba.
- **Tirada Iskaarintimeysay:** Dadka loo sheegay inayna u tagin dadka sababtoo ah waxa ay xiriir la sameeyey dadka qaba xanuunka COVID-19 ama loo malaynayo inay qabaan fayruuska xanuunkaasi.

Tiradayada iskaarintimeysay waxaa loo soo bandhigi doonaa sidani soo socota:

- Kula Kulmay Goob Ka Baxsan: dadka ay suurtagal tahy inay la kulmeen ama xiriir la sameeyeen qof qaban xanuunka COVID-19 meel ka baxsan iskuulka; iyo
- Kula Kulmay Goobta: Dadka ay suurtagal tahay inay kula kulmeen ama dhawaan la xiriireen qof qaba xanuunka COVID-19 iskuulada PPS.

Waxaan sidoo kale ka mid ah wadarta isugeynta maalinlaha ah ee la ururiyey dadka iskaarintimeeyey iyo/ama iskaliyeeyey maalin walba. Xogtani waxay diyaar u noqon doontaa dhammaan dugsiyada degmada iyo iskuul kastaba. Waxaad fursada u heli doontaa inaad doorataan waqti gaar ah ("taariikh bilowgeeda iyo dhammaadkeeda").

Waxaa sidoo kale ka mid ah inta uu dhan yahay **xaddiga tallaalka** shaqaalahayaga PPS. Waxaan aad ugu faraxsanahay xaddiga shaqaalahayaga tallaalan oo aad u sarreeya: boqolkiiba 95 shaqaalaha PPS waxa ay si dhammeystiran u qaateen labadii tallaalka ee cudurka COVID-19(

boqolkiiba 86 shaqaaluhu waxay soo gudbiyeen caddeynta tallaalkooda iyo boqolkii 1 dheeraad ah oo dhammeytiraya tallaalkooda u hadhsan).

Inkastoo macluumaadka shaashadu xaqiijinayo fiditaanka fayriiska bulshadeena Portland, waxaan ognahay haddii aynu qeybteena inaga aadan qabano dugsiyo ahaan iyo shakhsi ahaan waa yareyn karaan fiditaanka. Xitaa marka aan idinla wadaagno xogta ku saabsan sida uu COVID-19 u saameynayo gaar ahaan bulshada PPS, fadlan waxaad ogaataan inaan sii wadayno inaan kla socono oo aan idin siino waxyaabihii ugu dambeeyey ee iska bedelay qaabka uu u socdo COVID-19 iyo saadaalinta qaababka lagu go'aan qaadanayo ee suurtagal ah ee tirooyinka mustaqbalka kuna salaysan dabeecada bani'aadamka, xaddiga tallaalka,iwm.

Mar labaad waxaan idinka mahadcelineynaa dulqaadkiina iyada oo aan idila wadaageyna xogtani oo si fiican u wacyigaliyaneysa bulshadeena. Waxaan kale oo idiinka mahadcelineynaa inaad qeyb ka qaadanaysaa qeybtii idinkaga soo hagaagtay sidii aan u sugi lahayn nabadgelyada ardaydeena iyo qof kasta oo inaka mid ahba, iyo inaad ka gacan geystaan yareynta in waxbarashada socota hakad ku yimaado. Wada jir iyo wada jir kaliya waxaan xaqiijin doonaa in iskuuladeenu noqdaan goobo waxbarasho lagu qaato oo caafimaad ah sidoo kalena ammaan ah, iyo iyada oo muhiimada ugu weyni tahay in aan waxbrashada ay ardaydu fasalada ku qaadanayaan sii socoto oo ayna hakad inaga galin dhammaan sanadka oo dhan.

Mahadsanid.

Jonathan Garcia

**Madaxa Xafiiska Shaqaalaha, Xafiiska Guddoomiyaha Waxbarashada
Dugsiyada Dadweynaha Portland**

[Su'aalo ? faallo ?](#)
[Aynu Wada Hadalno](#)

